La soo xiriir

Wixii caawimaad dheeraada ah ama macluumaad ah:

Nooga soo wac si bilaash ah halkan 0800 40 85 900. khadadku waxay furan yihiinn 8:00 subaxnimo ilaa 9:00 fiidnimo todobo maalmood todobaadkii. Wicitaanada ka imaanaya telefoonada gacanta waxaa dhici karta in lagu dalaco iyadoo ku xiran shirkadda aad telefoonka ka qaaday. Dadka isticmaala telefoonka qoraalka ah waxa ay si bilaash ah inooga soo wici karaan 0800 40 85 936

Booqo helpscheme.co.uk

Email noogu soo dir info@helpscheme.co.uk

Dhambaal qoraal ah noogu soo dir 80002

Warqad noogu soo dir boostada bilaashka ah, Qorshaha ka Gacansiinta bedelashada

Fax noogu soo dir 0800 40 86 045

Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashada waxaa wada BBC, iyadoo heshiis la gashay Dowladda, si looga caawiyo dadka daôla ah iyo kuwa naafada ah in ay u bedeshaan TVôga digitalôka ah.

Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashada waxaa maamula, isagoo metelaya DSHS Limited, eaga plc. Eaga House, Archbold Terrace, Newcastle upon Tyne NE2 1DB.
Lambarka diiwaangelinta shirkadda 3858865.

Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashada

Buugyaraha Codeôka Heerarka Adeegga

Buugyarahani waa qayb aad u faahfaahsan oo ah Tuse Degdeg ah oo laga yaabo in aad hore usoo aragtay.



- helping you go digital

switchover help scheme

Tusmo

1 Hordhac

1a Waa maxay u Bedelashada Digital'ka?

1b Waa maxay danta laga leeyahay buugyarahan?

1c Mala heli karaa macluumaadkan oo qaab kale ah?

2 Qorshaha Gacansiinta

2a Miyaan u qalmaa?

2b Ma jiraa kharash la socda adeegga?

2c Sidee baan ku heli karaa gacansiinta?

2d Ka waran qalabka cusub?

2e Ma keeni kartaa mana rakibi kartaa qalabka cusub?

2f Ka waran haddii aan weli su'aalo qabo?

3 Khibradda macaamiisha

3a Sidee baan ula soo xiriir karaa Qorshaha Gacansiinta?

3b Ka waran haddii aanan ku qanacsaneyn adeegga?

3c Ilaalinta macluumaadkaaga gaarka ah

Appendix'ka 1'aad: La socodka waxqabadkeena

Appendix'ka 2'aad: Siyaasaddeena Ilaalinta kaydka macluumaadkeena

1 Hordhac

1a Waa maxay u Bedelashada Digital'ka?

U Bedelshada Digital'ka

TVôga UK gudaheeda wuxuu noqonayaa digital, dhawaanna signalkii TVôga ee soo jireenka ahaa waa laga jarayaa nawaaxigaaga. Laga bilaabo 2007 ilaa 2012, dhammaan signallada taleefishinada UK waxaa loo bedeli doonaa digital, oo ah TV gobol ka TV gobol. Tan waxaa loola jeedaa marka ay bedelashaddu dhacdo, qalab TV kasta ama duubaha fiidiyowga oo aan loo bedelin digital wuxuu soo saari doono shaashad bannaan.

Waa maxay Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashada? Ma u baahanahay?

Qorshaha Gacansiinta waxaa loogu tala galay in lagu caawiyo dadka u qalma in la caawiyo si ay hal TV ugu bedeshaan digital. Haddii aad u qalanto, waxaanu si waadix ah oo sahlan kuugu sharixi doonnaa TVôga digitalôka ah. Waxaanu gurigaaga ku xiri karnaa qalab kasta oo aad u baahan tahay, waana ku caawin karnaa intaa ka dib haddii aad dooneyso in aad suôaalo dheeraad ah ina waydiiso. Waxaanu hubin doonnaa in aad ku faraxsan tahay sida uu qalabku u shaqeeyo.

Haddii aad ka hesho wax ka badan shan kanaal mid ka mid ah TVôyadaada, waxay u badan tahay in aad heysato TVôga digitalôka ah. Haddii aad hesho shan kanaal ama wax ka yar, weli diyaar uma tihid bedelashada. Waxaanu kuu sahli karnaa in aad u bedelato digitalôka, lagaagamana baahnaxattaa in aad hesho TV cusub.

Sidee buu Qorshaha ka Gacansiintu uga bedellan yahay kuwa kale?

Waxaan kuu Ballan qaadeynaa in aan kuu

Sameyn doonno waxyaalaha soo socdo.

Si aan howlaha kuugu fududeyno waxaanu yeeli doonnaa:

- in wicitaankaaga uu ka jawaabo qof tababaran ee mashiin aanu noqon ;
- waxaanu kuu ogolaaneynaa in aad doorato qaabka aad dooneyso in aad macluumaadka u hesho;
- waxaanu ku siineynaa gacansiin weji-ka-weji ah haddii aad tan u baahato; islamarkaana
- waxaanu markasta isku dayeynaa in aan howlaha kaaga dhigno sida ugu sahalsan uguna waadixsan ee suurtagal ah.

Si aan kaaga caawino in aad wax xasuusato, waxaanu yeeli doonnaa:

- in aan kuu soo direyno warqad si aan u xaqiijino taariikhda ballantaada;
- in aan ku soo wacno (ama dhambaal qoraal aan kuu soo dirno haddii aad arintan nawaydiisato) maalin ka hor ballantaada ama maalinta aad ballanta leedahay, fadlan na waydiiso;
- in aan ku soo wacno (ama dhambaal qoraal aan kuu soo dirno) haddii aan bedelayno ballantaada.

Si aan kaaga caawino in aad ogaato halka aan taaganahay iyo waxa aan sameyneyno, waxaanu yeeli doonnaa:

- in aan kula socodsiino halka aan wax dhigo;
- in aan kuu sheegno haddii aan u wareegno qol kale; iyo
- in aan sharaxno waxa aan sameyneyno inta aan shaqada wadno.

Waxa aanu isbedel yar ku sameyn doonnaa gurigaaga waxaana yeeli doonnaa:

- in aan hubino walxaha booskoodii saxda ahaa in dib loogu celiyo;
- in aan waydiisano ogolaansho ka hor inta aanan waxba sameyn; iyo
- in aan sharaxno sababta aan uga tagnay gurigaaga walxaha cusub waxaana sharixi doonnaa waxa ay qabtaan.

Si aan kaaga caawino in aad fahamto waxa aan ka sheegeyno, ama aan kuu sahalno:

- Markasta waxaanu ku celcelin doonna waxa aan sheegno, ama waan tartiibineynaa, fadlan na waydii;
- Waxaanu hubin doonnaa in aan kula hadalno markasta oo aan kuu ifino haddii aadan garan;
- In aan kuu sahalno in aad hesho daryeelahaaga, tarjume ama qof kale oo kula jooga iyadoo ballan lagaaga sameynayo marka ay firaaqo leeyihiin, iyo
- In aan kula xiriirno qof kale isla macluumaadkii aan kuu soo dirnay, fadlan na waydii.

Si aan kaaga caawino in aad hubsato in aan nahay kuwa sheegayakuwa aan nahay, waxaana yeeli doonnaa:

- in aan hubino in dhammaan qalab rakibayaasha laga soo hubiyay Xafiiska Diiwaanka Dembiyada, ayna wataan ID iyo kaar lambar leh oo aad wici karto si aad u hubiso in ay yihiin dadka ay sheeganayaan;
- in aan hubino in rakibayaashu isticmaalaan furaha sirta ah haddii aad sidaas dooratay, marka uu isaga ama iyadu gurigaaga timaado; iyo
- in aan kuu sheegno magaca rakibahaaga.

Waxaanu markasta ku siin doonnaa waqti dheeraad ah haddii aad dooneyso. Waxaanu yeeli doonnaa:

- in aan ku sugno waxoogaa marka aan garaacno gambaleelka(dawanka) albaabkaaga; iyo
- in aan dulqaad muujino haddii aad jeclaan laheyd waqti dheeraad ah dhan kasta oo booqashadeena la xiriira.

Waxaa inaga gaŏnaan doonta in aan markasta xushmeyno gurigaaga iyo waxyaalaha aad aaminsan tahay.

Haddii aad na waydiiso sidaas, waxaanu yeeli doonnaa:

- in aan kabaha isaga siibno albaabka;
- in aan ballamaha ku beegno xilliyada aan salaadda la tukan; iyo
- in aan kuu diyaarino qof kula jooga haddii aad arintan ugu baahan tahay sabab diimeed, ama gaar ahaan xaalado kale.

Maxaa kale oo arintan gacan ka geysanya?

- Fadlan inoo sheeg marka aad codsaneyso, ama waqti kasta oo ka horeeya ballantaada, haddii ay jiraan wax aan sameyn karno si ay kuugu sahlaan howlaha.

1b Waa maxay danta laga leeyahay buugyarahan?

Buugyarahan waxaa loogu tala galay dhammaan macaamiisheena waxaana loo diyaariyay si uu kaaga caawiyo:

- fahamka waxyaalaha la heli karo iyo sida uu yahay hab-raacu;
- in aad ku kalsoonaato in aan dabooli doono baahidaada aadna ogtahay waxa aad naga rejeyn karto; iyo
- in aad ogtahay halkii aad aadi laheyd haddii aad u baahato macluumaad dheeraad ah.

1c Ma la heli karaa arintan oo qaabab kale ah?

Haa, macluumaadka buugyarahan iyo Qorshayaasha Gacansiinta kale waala heli karaa:

- iyadoo ah **daabacaad weyn** (daabacaad weyn, oo aad uga waadixsan sida caadiga ah);
- iyadoo ku qoran warqad midab leh (beige);
- iyadoo **Sahal loo Akhrin karo** (qayb aad soo fududeeyay oo midab badan iyo sawiro leh);
- iyadoo ah **Luuqadda indhoolayaasha**;
- ku jirto **CD**;
- ku jirto **DVD** ama **cajalad fiidiyow ah** oo leh Luuqadda Calaamadaha Britishka (**BSL**) iyo cinwaan hoosaadyo;
- ku jirto **barteena internetka** ama **email** ahaan; iyo
- iyadoo ah **10** luuqadood (luuqaduhu waxay ku xirnaan doonaan gobolka aad ku nooshahay).

2 Qorshaha Gacansiinta

2a Miyaan u qalmaa?

Dowladdu waxay u dejisay shuruudaha soo socdo Qorshaha Gacansiinta. Waad u qalantaa haddii:

- ay da'daadu 75 ka weyn tahay;
- aad ku soo noolaatay guri daryeel lix bilood ama ka badan;
- aad xaq u leedahay Gunno Nololeedka Naafada (DLA),

Gunnada Xaadiritaanka, Gunnada Xaadiritaanka Joogtada ah ama Caawimaadda Dhaqdhaqaaqa; ama

- aad tahay indhoole diiwaangashan ama hal il wax ka arka.

2b Ma jiraa kharash la socda adeegga?

Waxaanu ku waydiin doonnaa in aad bixiso **£40** oo la xiriirta kharashka, ilaa aad qaadato Credit'ka Howlgabka Taageero Dakhli ama Gunnada Shaqo doonka dakhliga ku saleysan, mid kasta oo ay tahayba gacansiintu waa **bilaash**.

Gacansiintu waxaa kale oo ay **bilaash tahay** haddii aad tahay qof weyn oo qaata mid ka mida manfacyada sare iyo Manfaca Ilmahaoo ah ilmo u qalma oo ku nool isla cinwaankaaga.

Adeegga la bixinayo waxaa ka mid ah:

- in lagaa caawiyo xulashada qalabka saxda ah;
- in lagu siiyo qalab si sahlan loo isticmaali karo oo baahidaada ku haboon;
- in lagaa caawiyo ku rakibidda qalabka gurigaaga;
- soo bandhigid si sahlan loo fahmi karo oo la xiriirta sida ay wax kasta u shaqeeyaan;

- rakibaad saxan oo cusub ama anteeno, halkii aan awoodno, haddii loo baahdo si qalabka cusubi u shaqeeyo; iyo
- qof aad wici karto si ay kuu gacansiiso inta aad la qabsaneyso qalabka.

2c Sidee baan ku heli karaa gacansiinta?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

Dalbashada gacansiinta

- Haddii aad u qalanto gacansiinta iyadoo la raacayo Qorshaha Gacansiinta, waxaad heli doontaa macluumaad isku xiran ama warqad boostada kaa soo gaari doonto taas oo lagugu casuumayo in aad dalbato gacansiinta marka gobolkaagu diyaar u yahay in uu u bedesho digital'ka.
- Waxaa kale oo aanu kuu sheegi doonnaa kala doorashooyinkaaga qalabka iyo adeegyada.
- Si aad su'aalo u waydiiso, ama aad u codsato gacansiin fadlan nala soo xiriir. Waxaad sidan yeeli kartaa adiga oo soo wacayo qadkeena gacansiinta Bilaashka ah, boosto ahaan, telefoonka qoraalka ah (minicom'ka), email ama barteena internetka ee ah helpscheme.co.uk. Wicitaanada qadkeena gacansiinta waxaa ka jawaabi doono qof.
- Dad tiro yar ayaa laga yaabaa in ay u baahdaan taageero weji-ka-weji ah. Haddii ay arintani kugu haboon tahay, waxaanu kuu soo diri doonnaa qof kaala hadla macluumaadka. Fadlan inoo soo wac sida ugu dhaqsaha badan si aad u hubiso haddii adeeggan la heli karo.

- Haddii aanan kula soo xiriirin laakiin aad u malayneyso in aad u qalanto gacansiinta, fadlan weli nala soo xiriir. Haddii aan xaqiijin karno in aad u qalanto, waanu aqbali doonnaa codsigaaga.

Mar allaale markii aad codsato gacansiinta

- Waxaanu kuu sheegi doonnaa waxyaalaha aad kala dooran karto iyo faahfaahino kale 14 maalmood gudahood marka aan helno codsigaaga.
- Marka aad inoo sheegto waxa aad dooneyso in aad doorato, waxaanu yeeli doonnaa:
  - in aan kugu waafaqno taariikh aan ballan kula yelano, iyadoo ku saleysan waxa aad inoo sheegto in aad doorbideyso (subax, galab, fiid);
  - in aan xaqiijino qaabka aad dooneyso in aan kuugu soo dirno macluumaadka (tusaale ahaan, daabacaad weyn, ama email ahaan);
  - in aan kugu waafaqno in aad isticmaasho fure sir ah markii aan ku soo wacno (haddii aad hore inoogu sheegtay in aan sidaa yeelno);
  - in aan ku waydiino haddaad qorsheyneyso in uu kula joogo saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah marka aan ku soo waceyno.
- Maskaxdaada waad kabedeli kartaa mid kasta oo arintan ka mid ah, laakiin hubi in aad inoo sheegto labo todobaad gudahood.

Sidee baad inoo gacansiin kareysaan

- Fadlan nala soo xiriir isla marka aad jawaab inaga hesho laakiin xusuusnow waxaanu tixgelin karnaa codsigaaga oo kali ah marka gobolkaagu bedesho digitalka.
- Marka aad inoo sheegto doorashada aad dooneyso, fadlan waxaa kale oo aad inoo sheegtaa haddii aad:

  - dooneyso macluumaad **qaab kale ah**, sida daabacaad weyn, mid Sahal loo Akhrin karo, Luuqadda indhoolayaasha, CD dhegeysi, ama DVD (waxaa kale oo aan kuu soo diri karnaa ogeysiisyo dhambaal qoraala ah haddii aad doorato);
  - jeclaan laheyd in uu kula joogo qof kale marka aan qalabka kuu keeneyno ama rakibeyno (tusaale ahaan, tarjume, daryeele, ama caawiye);
  - u baahan tahay tarjume Luuqadda Calaamadaha Britishka;
  - naga dooneyso in aan u sheegno macluumaadkan qof kale;
  - dooneyso gacansiin laakiin aad ka welwelsan tahay in aad kaligaa la joogto qofka wax rakibayo (waxaanu kuu diyaarin karnaa qof kale oo kula joogo marka aan ku soo wacno);
  - doorbideyso dokumeenti luuqad gaara ah markii ay suurtagal tahay; ama
  - ku nooshahay guri leh anteeno la wadago sida qayb guri ama falaadyo, ama dhismo kiro ah ama liis-gareysan.
- Haddii aad u maleyneyso in aad u qalanto qorshaha laakiin aadan hubin in aad hesho manfacyadii loo baahnaa, fadlan wac xarunteena xiriirka (faahfaahin buuxda waxaa laga helayaa bogga dambe).
- Mar allaale marka aad inoo sheegto xulashada doorashadaada, fadlan inoogu sheeg sida ugu dhaqsaha badan haddii aad dooneyso in aad bedesho doorashadaada, ama haddii aadan dooneyn in aad sii waddo codsiga. Tani waxay inaga caawineysaa in aan waxtar u yeeano.

2d Ka waran qalabka cusub?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

Qalab noocee ah ayaan heli doonaa? Muxuu bedelayaa?

- Dhammaan qalabka la kala dooranayo wuxuu ku sii siin doonaa **BBC 1, BBC 2, ITV 1, Channel 4, FIVE** iyo **qoraal digital ah (sida ike teletext'ga laakiin loogu tala galay taleefishinka)**, iyo kanaalo kale.
- waxaad heysataa waxyaalo badan oo la kala dooran karo oo qalab adeeg bixin ah. Tani waxay kala duwanaan doontaa iyadoo ku xirnaan doonto gobolka aad deggan tahay, laakiin waxaa ku jira anteeno, fiilo, broadbandôga, ama saxanka satelitêka. Waxaanu kuu sheegi doonaa waxyaalaha la kala dooran karo ee aad heli karto adigoo isticmaalaya Qorshaha Gacansiinta, iyadoo ah **£40 ama bilaash**. (Waxaa jiri kara kharash dheeraad ah oo loogu tala galay doorashooyinka kale.)
- Haddii aad doorato kala doorasho kharash dheeraad ah wadato:
  - waxaanu kuu sheegi doonnaa inta ay noqon doonto;
  - waxaa laguu diri doonaa adeeg bixiyaha si uu kuu caawiyo; oo
  - fadlan xusuusnow waa in aad bixiso wixii kharashaadka isqorista haddii ay kugu haboon yihiin.
- Qalabku wuxuu noqon doonaa mid digital ahaan loo diiwaangashay. Tani waxay muujineysaa in qalabka loo diyaariyay in uu shaqeeyo bedelaadda ka dib.
- Dhammaan kala doorashooyinku waxay la imaan doonaan xiritaanka, hab-raaca iyo taageerada tignikaalka ah.

Sidee baan ku heli karaa qalabkan cusub?

- Inta lagu guda jiro ballantaada la isku waafaqay waxaanu yeeli doonnaa:
  - in aan ku soo gaarsiino qalabka; ama
  - in aan ku soo gaarsiino oo rakibno qalabka cusub, kuna tusno sida loo isticmaalo. (Eeg Qaybta 2e.)

Faahfaahinta qalabka: si fudud maloo isticmaali karaa qalabka?

- Haddii aad xulato doorashada heerka caadiga ah, waxaad heli dooontaa qalab loo diyaariyay in si sahlan loo isticmaalo. Waxaa mid ahaan doono featuresôka sida rimuut koontaroolka kaas oo sahal loo qabsan karo, **Cinwaan hoosaada** Abc iyo **sharaxaad maqal ah** AD (adeeg maqal ah oo loogu talo galay dadka aragoodu liito taas oo bixisa faahfaahin dheeraad ah oo ah luuqadda dhaqdhaqaaqa jirka, dareenka muuqaalka iyo dhaqdhaqaaqa) oo lagu helayo hal batoon oo la riixo.
- Kala doorashadeena heerkeedu caadiga yahay ayaa lagu bixiyaa featuresôkan, laakiin qalabka kale ee digitalôka ma bixin doono.
- Haddii aad doorato kala doorasho aan aheyn tan heerkeedu caadiga yahay, waa in aad waydiisaa halka aad ka soo qaadaneyso haddii ay bixin doonaan rimuut koontarool si sahlan loo isticmaali karo.

Haddii aadan u baahnen featuresôkan ama taageero ku aadan sidii loo rakibi lahaa qalabkaaga, waxaa dhici karta inaad tixgeliso kala doorashooyinka kale ee aan aheyn Qorshaha Gacansiinta. Nasoo wac haddii aad suôaalo qabto.

Sida aad inoo caawin karto

- Haddii ay tahay in aad bixiso £40 oo loogu talo galay Qorshaha Gacansiinta, fadlan bixi tan ballantaada ka hor. Ma bixin karno mana rakibi karno qalabka adigoo aan marka hore bixin lacagta.

2e Ma keeni kartaa mana rakibi kartaa qalabka?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

Haddii aad doorato in aan kuu keeno qalabka oo kali ah

- Waxaanu kuu keeni doonnaa qalabka, qaabka rakibaadda oo sahlan oo ah kii aad dooratay (sida mid Sahal loo Akhrin karo ama CD la dhegeysto) warqado gacansiin oo si sahlan loo isticmaali karo oo gurigaaga lakeenayo ama cinwaankii kasta ee ku yaal gudaha UK ee aad na siisay.
- Haddii aadan guriga joogin marka aan isku dayno in aan qalabka keeno, waxaanu ka tagi doonaa faahfaahinta xiriirkeena si aad u diyaarsato ballan kale oo aan kugu soo wacno.
- Waxaanu isku dayi doonnaa ugu yaraan labo waqti kale oo dheeraad ah.

Haddii aad doorato in aan kuu keeno, rakibno oo aan ku tusno sida loo isticmaalo qalabka

- Waxaanu ka shaqeyn doonnaa howlaha tignikaalka ah ee lama huraanka kuu ah si aad u hesho **BBC 1, BBC 2, ITV 1, Channel 4, FIVE** iyo **qoraalka digital'ka ah** (oo bilaash lagu daawanayo). Tan waxaa ku jiri kara in la kordhiyo anteenadaada ama saxanka satelitêka. (Ma ogaan karno haddii ay arintani lagama maarmaan tahay ilaa aan imaano si aan qalabka ugu xirno.)

- Haddii aad naga dooneyso, waxaanu ku tusi doonnaa sidii aad u isticmaali laheyd qalabkaaga cusub iyo wixii qaab isticmaal ah. Waxaanu sida ugu wanaagsan u sameyn doonnaa talaab-talaab, inagoo hoos ka bilaabeyna taas oo si sahlan loo fahmi karo.
- Marka aan qalabka rakibno oo aan ku tusno sida loo isticmaalo waxaanu yeeli doonnaa:

  - waxaanu kaaga tegi doonnaa waraaqo gacansiin ah oo si sahlan loo isticmaali karo iyagoo ah qaabkii aad doorbido; iyo
  - in aan ku siino faahfaahinta xiriirkeena. Shaqaalaheena ayaa ka jawaabi suâaal kasta oo la xiriirta Qorshaha Gacansiinta ee aad qabto.

- Haddii aad ku nooshahay guri anteenadiisa la wadaago ama saxanka satelitêka oo aan la casriyeyn, sida falaadyo isku xiran ama guri la wadaago, waxaa lagaaga baahan yahay in aad la xiriirto qofka masûuulka ka ah (tusaale ahaan, milkiilaha gurigaaga) si loo hubiyo in uu u diyaarsan yahay u Bedelashada Digitalêka. Ma awoodno in aan ku casriyeyno anteenooyinka la isla isticmaalo ama saxanada satelitêka Qorshaha Gacansiinta.
- Waxaa inaga goân in aan kuu rakibno qalabka dhowr booqasho gudahood haddey suurtagal tahay.

Ballanta (keenitaan kali ah ama keenitaan iyo rakibaad)

- Waxaanu kula soo xiriiri doonnaa waqti u dhow ballantaada si aan kuu xusuusino in aan imaaneyno.
- Waanu xattaa ku soo wici doonnaa si aan kuugu sheegno in aan soo socono, ilaa aad dooratay in aan kuu soo dirno ogeysiis qoraal ah, markii arintu sidaa tahay qoraal ayaanu kuu soo diri doonaa.
- Haddii aan soo daaheyno, waanu ku soo wici doonnaa ama qoraal ayaan kuu soo diri doonnaa si aan kuugu sheegno.

- Amnigaagu aad ayuu muhiim inoogu yahay. Haddii aad dooratay furaha sirta ah, waanu isticmaali doonnaa marka aan imaano, waxaana leenahay dhowr hab oo aan isku caddeyn karno, sida kaar muujinaya lambarka telefoon aad wici karto si aad u hubiso kuwa aan nahay, iyo kaararka garashada. Shaqaalaheenu marnaba sooma gelayaan gurigaaga ilaa aad ku qanacdo in ay yihiin kuwa ay sheeganayaan.
- Inaga ayaa debereyna howsha baakadeynta haddii aad sidaa naga dooneyso.

Rakibayaasheena iyo qaadayaasheena waxay dhammaan:

- heystaan hubinta Xafiiska Diiwaanka Dembiyada (CRB); waxaanay
- xiran yihiin dhar lagu garan karo.

Rakibayaasheenu waxay iyana:

- markasta ula dhaqmayaan gurigaaga si xushmad leh marka ay qalabka kuu rakibayaan, waxaana ka goôan in waxkasta booskoodii ku soo celiyaan; waxaana
- lagu xulaa xirfaddooda iyo dabeecaddooda.

Waxa aad Inaga rejeyn kartaa in aan :

- kuu digno haddii aan u baahano in aan dhaqaajino qalabka guryaha kuuna sharaxno sababta;
- in aan kuu sheegno haddii iyo sababta aan ugu baahannahay in aad qolka ka baxdo;
- in aan kuu sharaxno waxa aanu sameyneyo waqti kasta aana kuu sheegno horumarkeena inta ay howshu socoto;
- in aan noqono kuwo waxtar leh oo aqoonna leh, laakiin hadana aan muujino dulqaad badan marka aan ka jawaabeyno suôaalaha;
- in aanbaneyno meelaha lagu socdo kuuna sheegno halka alaabta la dhigay inta aan shaqeyneyno; iyo

- in aan noqono kuwo saaxiibtinimo leh xushmadna badan waqti kasta.

Sida aad inoo caawin karto

- Waxaanu dooneynaa in aan kaaga dhigno u Bedelashada Digitalôka mid sahlan. Haddii aan sameyno khalad, fadlan inoo sheeg si aan u saxno.
- Haddii aad naga dooneyso in aan gurigaaga ka tagno sabab darteed inta aan shaqada wadno, waanu yeeli doonnaa haddii aad sidaa na waydiiso laakiin waxaanu rejeyneynaa in tani aysan aheyn lagama maarmaan.
- Haddii aad ka welwelsan tahay qalab rakibe gurigaaga soo booqanayo marka aad kaligaa tahay, fadlan inoo sheeg. Waxaanu awoodi karnaa in aan diyaarino qof kula jooga.
- Haddii aad seegto ballantaada adigoo ka maqan guriga darteed sabab darteed, fadlan ina soo wac marka aad timaado waxaana kuu diyaarin karnaa waqti kale.

2f Ka waran haddii aan weli su'aalo qabo?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

In aan ku caawino marka aan kuu keeno oo kuu rakibno qalabkaaga

- Waxaad nala soo xiriiri kartaa waqti kasta inta lagu jiro bedelashada gobolkaaga iyo ilaa 12 bilood ka dib. (ka eeg faahfaahinta xiriirka bogga dambe.) Waxaanu ku faraxsanaan doonnaa in aan ka jawaabno suôaalahaaga ku saabsan Qorshaha Gacansiinta iyo qalabka aan bixino, waana ku soo booqan doonnaa haddii loo baahdo.
- Ka dib marka aan rakibno ama keeno qalabka, dad tiro yar ayaa laga yaabaa in ay u baahdaan in ay qof ula hadlaan weji-ka-weji. Haddii arintani kugu haboon tahay, waxaanu kuu soo diri karnaa qof ka jawaaba suôaalahaaga. Fadlan na soo wac si aad u hubisid in adeegaan la heli karo.

- Haddii qalabka Qorshaha Gacansiinta uu haleysan yahay, waxaanu soo diri doonnaa rakibe si uu u dayactiro, bedelo ama dib ugu rakibo haddii ay tahay 12 bilood gudahood waqtiga damaanadda.

Sida aad inoo caawin karto

- Fadlan ha isku **dayin** in aad dayactirto ama aad habeyso anteenada ama saxanka satellitek ka kaligaa, ama ha waydiin saaxiib ama qaraabo in uu sidaa yeelo.

3 Khibradda macaamiisha

3a Sidee baan ula xiriiri karnaa Qorshaha Gacansiinta?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

Xarunta xiriirka

- Waxaanu leenahay saacadaha shaqadaha oo dheer si ay kuugu haboonaato. Saacadaheena caadiga waxay bilowdaan laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 9:00 fiidnimo, maalin kasta marka laga reebo maalmaha fasaxa.
- Ilaa aan helno tiro aan la rejeyneyn oo wicitaano ah, saacadaha aan furan nahay wicitaankaaga waxaa ka jawaabi doono qof, mashiin kama jawaabayo.
- Shaqaalaheenu waxay kaa caawin karaan suâaalaha la xiriira qalabka digitalk ka iyo Qorshaha Gacansiinta.
- Dhammaan shaqaalaha xarunta xiriirka waxaa hubin doono Xafiiska Diiwaanka Dembiyada.

Waxaad inoola soo xiriiri kartaa qaababka soo socdo

- Telefoon bilaash ah: 0800 40 85 900
- Boosto ahaan: boostada bilaashka ah, Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashasda
- Telefoonka qoraalka ah (minicomk ka): 0800 40 85 936
- E-mail: info@helpscheme.co.uk
- ï Barta internetka: helpscheme.co.uk

Waxaanu macluumaadka ku bixin karnaa luuqado kale oo badan, laakiin liistada saxda ah waxay ku xirnaan doontaa gobolka aad ku nooshahay. Fadlan waydii luuqadaha laga heli karo gobolkaaga.

Waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u Bedelashada Digitalk ka iyo Qorshaha Gacansiinta baraha internetka soo socodo.

- Qorshaha ka Gacansiinta Bedelashada: (helpscheme.co.uk) (digitaltelevision.gov.uk/publications/pub_dighelpscheme_cm7523.html)
- Digitalk ka UK (digitaluk.co.uk)
- Telefishinka Digitalk ka ah (digitaltelevision.gov.uk)
- Ofcom (ofcom.org.uk)

3b Ka waran haddii aanan ku qanacsaneyn adeegga?

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

- inaad noo sheegi kartaa waxa aad ka aaminsan tahay qayb kasta oo ka mid adeeggeena.

- Haddii aadan nagu waafaqsaneyn waxyaalaha ku saabsan haddaadan u qalmin Qorshaha Gacansiinta, faldan ka wac xarunta xiriirka si bilaash ah halkan 0800 40 85 900. Haddii aadan weli qanacsaneyn, dib ayaad usoo wici kartaa si aad u waydiisato racfaan.
- Waanu ka jawaabi doonnaa dhammaan codsiyada, iyo natiijooyinka, dib u eegista iyo racfaanada sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan.
- Haddii aan khalad sameyno, ama haddii aad wax dhibaatooyin ah qabto, waad nala soo xiriiri kartaa qof ayaana ku caawin doono.
- Waxaanu kugu waydiin doonaa talo siin habab kala duwan waxaadna awoodi doontaa in aad doorato sida aad wax uga dhaheysid adeeggeena.

Sida aad inoo caawin karto

- Nagu sii taladaada mid ka mid ah hababka soo socdo ee aan bixino aana ogaano sida aan wax u qabaneyno.

3c Ilaalinta macluumaadkaaga gaarka ah

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

- Waxaanu u isticmaali doonnaa macluumaadkaaga gaarka ah Qorshaha Gacansiinta oo kali ah.
- Waxaanu aad uga taxadiri doonnaa in aan u ilaalino macluumaadka aad ina siiso si qarsoodi ah.
- Waanu xafidi doonnaa macluumaadkaaga intii macquul ah Qorshaha Digitalka ka dib, ama ka dib markii aad inoo sheegto in aadan nooga baahneyn gacansiin.
- Haddii uu saaxiib ama qaraabo kaa caawiyo Qorshaha Gacansiinta, waxaanu kaa qaadan doonnaa oo aan u isticmaali doonnaa faahfaahinta gaarka ah ee qofkaas si la mid ah sida ku xusan.

Appendix'ka 1'aad: la socodka wax-qabadkeena

Waxaan kuu ballan qaadeynaa

Waxaa muhiim ah in Qorshaha Gacansiinta lagu bixiyo adeeg baahidaada u qalma.

Qorshahani wuxuu noqonayaa mid guuleysta haddii:

- aad hesho qalabka Qorshaha Gacansiinta oo aad isticmaali karto, baahidaada dheeraadka ahna haqabtiri karo;
- adiga (ama qof ku metelaya) uu ogyahay halka laga helo gacansiinta;
- ay kuu sahlanaato helitaanka macluumaadka ku saabsan qaabka saxda ah ee Qorshaha Gacansiinta;
- laguula dhaqmo si leh ixtiraam, xushamad iyo isfaham waqti kasta ah;
- aad fahmi karto bandhigga iyo macluumaadka aan ku siino; islamarkaana
- marka ugu dambeysa bedelashada, waxaad isticmaali kartaa teleefishinkaaga si aad uga daawato **BBC 1, BBC 2, ITV 1, Channel 4, FIVE** waxaadna heli kartaa **dqoraal digital ah**.

Cabiraadda waxqabadkeena

Waxaanu si joogta ah ula socon doonnaa waxqabadkeena ka soo horjeeda Codeka Heerarka Adeegga.

Hababka aan ku cabireyno waxqabadkeena waxaa ka mid ah:

- eegitaanka degdegta aan macluumaadka kuugu soo gudbino marka aad codsato ka dib;
- in aan kuu ogolaano in aad nala soo xiriirto adigoo waxoogaa soo daahay, dhibaato malaha sida aad doorato in aad noola soo xiriirto;
- in aan u jawaabno codsiyada boostada ku yimaado ee gacansiinta rabo labo todobaad gudahood;
- in looga jawaabo emailada todobaad gudihiis;
- in aan ku rakibno qalabka booqashada koowaad haddey suurtagal tahay; iyo
- in la eego sida aad ugu qanacsan tahay Qoshaha Gacansiinta. Ururada kale ayaa iyana cabiri doono waxqabadkeena.
- BBC Trust waxay xaqiijin doontaa in qorshaha gacansiinta loo maareeyo si ay u bixiso qiima lacageed halkii ay ka ahaan lahayd qarash bixiyeyaal liisan leh.
- BBC Trustdu waxay daabici doontaa warbixin ku saabsan horumarka sanad kasta.
- Xafiiska baaritaanka Xisaabaadka Qaranka ayaa lagu casuumi doonaa in ay dib u eegis ku sameyso haddii ay yihiin adeegyada aan bixino kuwo u qalma lacagta ugu yaraan labadii sanaba mar.

Appendix’ka 2’aad: siyaasaddeena ku aaddan ilaalinta macluumaadka

1 Waxaanu u ururin doonnaa una isticmaali doonnaa faahfaahinta macluumaadkaaga gaarka ah si aan kaaga gacan siino Qorshaha ka Gacansiinta Bedellashada.

2 Faahfaahinta aan ururino oo aan isticmaalno waxay noqon karaan kuwo gaar u ah qofka (tusaale ahaan, haddii aad u diiwaangashan tahay indhoole ahaan) haddii ay lagamamaarmaan u tahay in ay naga caawiso siddii aan u wadi laheyn howlaha Qorshaha Gacansiinta.

3 Waxaanu siin doonnaa oo kali ah faahfaahinta macluumaadkaaga gaarka ah qof ama shirkad lagama maarmaan u ah in aad hesho gacansiinta iyadoo la raacayo Qorshaha Gacansiinta. Haddii aad doorato qalabka TV-ga digitalka ah iyo wixii adeeg aad iska qorto adeeg bixiye kale oo aan aheyn doorashada heerkeedu caadiga yahay, waxaanu siin doonnaa magacaaga, cinwaankaaga iyo macluumaadkii kale ee la xiriira. Adeeg bixiyaha kale waxay kuu sheegi doonaan sida ayu isticmaalayaan macluumaadkaaga. Ma bixin doonno macluumaadkaaga gaarka ah xaalad kasta oo kale ilaa aan marka hore ogolaansho kaa helno.

4 Waxaanu uga taxadiri doonnaa faahfaahinta xiriirkaaga sida ugu macquulsan marka aan ku siino dhammaan adeegyada ama ka dib marka aad inoo sheegto in aadan rabin in aad taageero ka hesho Qorshaha Gacansiinta.

5 Haddii aad waydiisato saaxiib ama qof qaraabo ah in uu kaa caawiyo Qorshaha Gacansiinta, waxaanu u qaadan doonnaa oo aan u isticmaali doonnaa qofkaas faahfaahintiisa gaarka ah si la mid ah sida kor ku xusan. Fadlan hubi in saaxiibkaa ama qofka aad qaraabada tihiin uu arintan la socdo.